

# MIYAAN AHAY HALYEY DHAWRAN?

Sharciga Gargaarka Dib ula qabsashada Halyeyga Waagii Fiyatnaam ee 1974 soo baxay (Vietnam Era Veterans' Readjustment Assistance Act of 1974) (VEVRAA), ee la beddelay (38 U.S.C. § 4212), ayaa mamnuucaya in takoor ama kalasoo loo geysto halyeyga dhawran.

Marka la raaco sharciga VEVRAA, waxaa halyeyga lagu tilmaami karaa "halyey naafo," "halyey dhawaan la reebay," "halyeyga kaarka hawsha firfircoon ee waqtiga dagaal ama olole," ama "halyeyga billadda adeegga Ciidanka Hubka sida."

## GARO XAALADDAADA HALYEYGA

**1** Hawl firfircoon\* ma ka qabatay Militari Maraykan?

\*Ka fiiri 38 USC § 101(21) liiska buuxa ee adeegga hawl firfircoon noqon kara.

**2** Ma lagaa rukhseeyey ama lagaa sii daayey adeegga adigoo ku baxay shuruudo aanan ahayn sharaf dhac?

Haddii aad "haa" kaga jawaabtay su'aalaha sare, u dhaaf su'aalaha hoose. Haddii aad "maya" kaga jawaabtay su'aalaha midkood, waxaa laga yaabaa in aanan lagu arkin halyey dhawran.

## GARO HADDII AAD SHARCIGA VEVRAA KU DHAWRAN TAHAY

### HALYEY NAAFO

- Miyaad tahay halyey Militari Maraykan oo magdhaw u qalma (ama haddii uusan qaadan mushaar hawlgab ee militari magdhaw u qalmi lahaa) marka la raaco shuruucda uu hirgeliyo Xoghayaha Arrimaha Halyeygu??  
*ama*
- Miyaa hawl firfircoon lagaa rukhseeyey ama lagaa sii daayey naafo adeegga ku xiran awgeed??

### HALYEY DHAWAAN LA REEBAY

- Miyaa hawl firfircoon lagaa rukhseeyey ama lagaa sii daayey saddexdii sano ee ugu dambeeyey??

### HALYEYGA KAARKA HAWSHA FIRFIRCOON EE WAQTIGA DAGAAL AMA OLOLE

- Miyaad hawl firfircoon ka qabatay hal ama in ka badan oo ka mid ah waqtiyada dagaal ee ku xusan **38 U.S.C. § 101**?†
- Miyaad hawl firfircoon ka qabatay olole ama duullaan loo rukhseeyey kaarka ololaha marka la raaco shuruucda ay hirgeliyo **Wasaaradda Difaacu?**

### HALYEYGA BILLADDA ADEEGGA CIIDANKA HUBKA SIDA

- Miyaad hawl firfircoon ka qabatay olole militari Maraykan oo laga bixiyey Billadda Adeegga Ciidanka Hubka sida taasoo raacsan Amarka Madaxweynaha ee 12985 (61 FR 1209) miyaana lagu siiyey Billadda Adeegga Ciidanka Hubka sida?
- Haddii lagu siiyey Billadda Adeegga Ciidanka Hubka sida, miyay ku qoran tahay foomkaaga **DD Form 214**?

Haddii aad "haa" kaga jawaabtay mid ka mid ah su'aalaha qaybaha sare ku jira, waxaa laga yaabaa in aad sharciga VEVRAA ku dhawran tahay. Halyeygu waxuu ugu qalmi karaa in ka badan hal qayb. Haddii qaybaha midkood aadan ku jirin, waxaa laga yaabaa in aadan ahayn halyey dhawran.

Fadlan ogsoonow in boggan lagu bixinayo macluumaad guud. Looguma tala galin in ay beddesho sharciga iyo shuruucda dhab ahaan khuseeya barnaamijka halkan ku sharraxan.

†Taariikhaha Waqtiga Dagaal: Colaadda Kuuriya Juun 27, 1950 - Jannaayo 31, 1955; Waaga Fiyatnaam Febraayo 28, 1961 - May 7, 1975 wixii khuseeya halyeyga ka adeegay Jamhuuriyadda Fiyatnaam ama August 5, 1964 - May 7, 1975 dadka kale dhammaantood; Dagaalka Gacanka Beershiya August 2, 1990 - hadda.

Haddii aadan haysanin foomka DD-214 Form, ama aad su'aalo kale ka qabto xaaladdaada halyeyga, fadlan Wasaaradda Arrimaha Halyeyga kala xiriir lambarka 1-800-827-1000.



OFFICE OF FEDERAL CONTRACT COMPLIANCE PROGRAMS  
U.S. Department of Labor